Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta

Soo-jeedinayaa

# Ciise Duufaankii Badda Dejiyey



Waxa qoray: Edward Hughes


Waxa Tusaaleeyay: Janie Forest
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: Ruth Klassen

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2023 Bible for Children, Inc.
Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.



Ciise iyo
Xertiisii dooni
bay saarnaayeen
kolkii dufaanta ku
kacaysay.  Baddii
Galile si xanaaq
badan bay isu
laalaabantay.
Duufaanka noocan
ah wuxuu burburin
karaa oo dejin -
quusin karaa
maraakiibta.

Duufaankii weynaa wuxuu cabsi galiyey xertii. Mowjadihii-hirarkiina waxay qariyeen doonida. Oo biyo ayaa ka soo buuxsamay. Laakiin Ciise xagga hoose ayuu hurday, wuu iska hurday duufaantoo jirta.




Xertiisii baa Ciise hurdada toosisay, iyagoo ku qaylinay "Sayidow, Sayidow, waa dhimanaynaa oo baa'ba'-eenaa!"

Kolkaasuu wuxuu ku yidhi xertiisii, “Maxaad u baqanaysaan rumeysadyarayaalow.” Dabaded Ciise wuxuu amar ku siiyey dabayshii kacsanayd inay joojiso isgaraaciddeeda …… Oo … Ciise wuxuu amar hirarkii kacsanaa inay aayar degto-tartiibsato …



OO DABAYSHIINA WEY DEGTAY ... BADDIINA WAY NABDOONAATAY OO XASISHAY.


Xertii wey yaabtay, iyagoo leh, "Waa nin caynkee ah kan dabaysha iyo badduba yeeleen Isaga."




Waaa dambe ka dib, Ciise maalin kale pp howl badan ayaa jirtay. In ka badan 5000 oo qof ayaa u soo raacday Isaga meel lama dagaaan ah oo ban ah. Awoodda Ilaah Ciise wuxuu quudiyey dadkii badnaa ee isu soo baxay isaga oo isticmaalayo wiil yar qadadiisa. Waa galin dambe. Ciise cid walba wuu iks diray.



Xitaa xertiisii way ka tageen. Ciise wuxuu sii saaray dooni inay Isaga uga sii hormaraan dhanka kale ee badda Galilee.





Markii uu cidwalba iska diray, ayuu fuulay buurta dusheeda Isaga keligii inuu ku soo tukado.  Kolkii fiidkii la gaaray, keligii buu ku ahaa meeshaa.



Meel dhulka ka fog harada dhexdeeda xertii waxaa dhibay oo qabsaday dabaylo duufaan wadato.



Duufaantiina waxay ku joojisay iyaga inay ka soo gudbaan biyahaa, inkasta oo ay xitaa saacado badan isku dayeen inay soo gudbaan. Xertii ma aysan garanaynin taa, laakiin waxay la kulmeen wax weyn oo ka yaabiyey.



Inta u dhaxeysa meelahaa saacaddu ku began tahay qiyaas ahaan ilaa saddexdii iyo lixdii aroornimo iyadoo dabaysha badda ruxeysa, ayaa xertii waxay arkeen wax cabsi baadan ku beeray. Oo waxay ku qayliyeen, “Alla waa waa ruuxaan.”



Laakiinse wuxuu ahaa Ciise, Rabbigoodii iyo Sayidkoodii, oo ku soo socda iyaga, KUNA SOCDA BIYAHA DUSHOODA.

“Kalsoonaada!” Ciise ayaa sidaa ugu yeedhay iyagii, “Waa aniga ee ha baqina,” Markaasaa Butrus u jawaabay oo ku yidhi, “Sayidow, haddaad adiga tahay, igu amar inaan biyaha kuugu dul imaado.” Ciise wuxuu ku yidhi “Kaalay, dhiiranow, Butros markuu doonida ka degay ayuu biyihii ku dul socday inuu u tago Ciise.”





Laakiin Goortuu dabaysha arkay, ayuu cabsaday Butros, oo markaasuu bilaabay inuu dego, isaga oo ku qaylinaya “Rabbiyow i badbaadi.”

Duradiiba, Ciise Ciise ayaa gacantiisuu u taagay oo qabtay oo ku yidhi, “Rumeysta yarayahow maxaad u shakiday?” Oo markay doonida fuuleen Butros iyo Sayidkiisa Ciise dabayshii wey degtay.



Oo kuwii doonida ku jirayna way caabudeen Ciise, "Runtii waxaad tahay Wiilka Ilaah."



# Ciise Duufaankii Badda Dejiyey

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Matayos 8, 14, Markos 4, Luukos 8

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiyaa." Sabuurka 119:130

Dhammaad

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16